# Contents


Mahadnaq....3
Horudhac....4
Ujeedada Kormeerka....5
Golayaasha Degaanka....6
Golaha Degaanka Boorama....6
Kulankii Maayorka Gabiley....9
Golaha Deegaanka Degmada Burco....10
Kulankii Maayorka Caasimada....12
Kulankii Wasiirka Daakhilaga ....12
Baaqashadii Mayorada iyo doorkii Wasaaradda Daakhiliga....13

Isuduwayaasha Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dawlada ee Gobolada....14
Isuduwayaasha Gobolka Awdal....14
Isuduwayaasha Gobolka Gabiley....15
Isuduwayaasha Gobolka Saaxil....16
Isuduwayaasha Gobolka Tog-dheer....18
Isuduweyaasha gobolka SOOL....20
Dekada iyo Kastamada Gobolad....22
KastamkaBerbera....24
DekedaBerbera....25
Haamaha Shidaalka Berbera....26
Degmda Wajaale....27
Waaxda Garsoorka....28
Badhasaabada Gobolada....29
Wax yaabihii ka soo baxay Guud ahaan Kormeerka Gobolada....31
Talo-bixinta iyo Soo jeedimaha Guddida....31
Gabo-gabo....33

# Jamhuuriyadda Somaliland

## Golaha Wakiiladda

**Guddida Ilaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka**



# Mahadnaq.

Ugu horayn waxaan u mahadnaqaynaa ilaahay Subxaana watacaala na waafajiyey inaanu kormeerkan u baxno si habsamiyana noogu dhameeyo. Marka xigana shirgudoonka golaha wakiilada Oo si joogto ah noola socday marba hawlahayagu halkay marayaan.

waxaa kaloo aan halkan uga mahadnaqayaa xubnaha Guddida ilaalinta iyo dabagalka Hantida qaranka ee Golaha wakiilada, oo ay ka mid ahaayeen;- Xil; Cabdiqaadir Jaamac Xaamud, Xil; Rashiid maxamed Ismaaciiil, Xil; Xuseen Ismaaciil Yuusuf, Xil; Nasir X. Cali shire, Xil; Mohamed Farah Qabile iyo Xil; Ibrahim Axmed Haybe, Xildhibaanadaas oo ay dhammaantood ka Go'nayd in ay gutaan waajibaadka uu distuurku faraayo.

Waxaan kaloo aad iyo aad u boogaadinayaa Shaqaalihii Golaha ee Habeen iyo maalinba u soo jeeday isku dubaridka iyo habaynta wixii aanu qabanay iyo sidii wax muuqdaa uga soo bixi lahaayeen oo ay ka mid ahaayeen Suleymaan Cabdisitaar Dubad (Samataliye), Cawad Cali Maxamed, Cabdinasir Cismaan Maxamuud (Foodcade) iyo Maxamuud Cabdi Biixi (Camo), Ismahan Ibraahim Yusuf, Hibo Maxamed Ibraahim

Waxaa iyaguna nagu qasab ah in aanu u u mahadnaqno madaxdii Gobolada iyo degmooyinka AWDAL, GABILEY, SAAXIL IYO TOGDHEER waxaa sidoo kale aanu u mahadnaqaynaa xildhibaanada golayaasha deegaanka Gobolada oo Hadaanaan Taageeradooda helleen aanu noo suura galeen kormeerkan qiimaha badani.

Ugu danbayntiina waxaan u mahadcelinaynaa Hay'adda AWEPA oo gacan dhaqaale ka geysata, iyo dhamaan cid kasta oo ka qayb qaadatay hawshan xilna iska saartay inay hirgasho.

Mudane Maxamed Cali Xirsi
Gudoomiyaha Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka
Hantida Qaranka Golaha wakiilada JSL

# Hordhac:-

Golaha Wakiilada Jamhuuriyadda Somaliland waa golihii ugu horeeyay ee si dimuqraadi ah loo soo doorto sannadkii 2005ka. Waana Golihii Afraad taariikhda Somaliland soo mara laga soo bilaabo Golihii Baarlamaanka ee ugu horeeyay sannaddii 1960kii.
Golaha wakiiladu waa mid ka mida Labada Aqal ee baarlamaanka Somaliland ka Kooban yahay (Guurtida iyo  Wakiilada) oo marka laysku daro loogu yeedho Xeer Dejin ama Baarlamaan.

Xeerdejinta dalku waxay ka mid tahay Sadexda dhar-dhaar ee Qaranku ku qotomo, sida uu ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Aqalka Golaha Wakiiladu waa xubno ka wakiil ah dadweynaha; waana Qaybta l-aad ee Xeer-dejinta dalka, ansixinta xeerarka, oggolaanshaha iyo ilaalinta siyaasadda guud ee hoggaaminta dalka sida uu xusay qodobka 39aad ee Dastuurka Qaranka.

Golahani waxa uu ka kooban yahay 82 xubnood oo laga soo kala doortay dhamaan deegaanada Somaliland.,  Muuqa duleed ee uu Golaha Wakiiladu leeyahay waxaa u dheer inuu leeyahay Guddiyo u kala xilsaaran hawlo iyo shaqooyin kala duwan waxaanay ka kooban yihiin 10 Guddi sida ku xusan xeer hoosaadka Golaha.

Guddidan Ilaalinta Iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay ka mid tahay  tobanka Guddi-Hoosaad ee uu Golahani ka kooban yahay waxaanay Golaha uga masuul yihiin arrimaha la xidhiidha ilaalinta Hantida Qaranka, koormeeridda Ilaha Dhaqaalaha, Wax ka waydiinta xilgudashada masuuliyiinta Dawlada.

Guddidan Ilaalinta Iyo Dabagalka Hantida Qaranku iyagoo dardarglinaya hawlaha Golahu u xilsaaray waxay la kulmeen ka hor intaanay safarkan u bixin dhamaan Wasaaraddaha iyo Hay'adaha hoos ku xusan.

1. Wasaaradda Arrimaha Gudaha
2. Wasaaradda Xanaada xoolaha
3. Wasaaradda Macdanta iyo tamarta
4. Wasaarda Caafimaadka
5. Hay'ada Qandaraasyada
6. Hay'ada Shaqaalaha
7. Madbacada qaranka
8. Hantidhawraaha Guud
9. Xisaabiyaha Guud
10. Somaliland National TV
11. Bangiga  Qaranka
12. Komishanka maamul wanaaga
13. Wakaalada Biyaha
14. Wakaalada Korontada
15. Hay'ada WHO
16. Hay'ada UNICEF
17. Hay'ada UNDP

Kormeerka ay gudidu ugu baxday 4ta Gobol  waxay kulamo kala duwan la yeesheen madaxda iyo hay'adaha hoos ku qoran

## Ujeedada Kormeerka:

Ujeedada kormeerka Guddidu waxay ahayed sidatan hoos ku xusan:-

• U kuur-galida habsamida Maamul ee Gobolada iyo Demgooyinka dalka iyo sidey u shaqeeyaan.
• Soo darsisaada Dhaqaalaha Gobolada iyo Degmooyinka dalka ka gaadha Miisaaniyada Guud ee Qaranka iyo siday ugu shaqeeyaan.
• Xog-ogaal noqoshada Baahiya Dhaqaale iyo Sharci ee ka jira Gobolada dalka iyo sidii Miisaaniyada iyo xeeraka loogu saleyn lahaa baahiyaha dalka guud ahaan.
• Kormeerida ilaha dhaqaalaha dalka sida kastamada, dekeda iyo sidey dakhliga dawlada u soo saaraan isla markaana u maamulaan.

| No. | Meelaha lala kulmey | Gobolka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Golaha Deegaanka Degamada Boorame | Awdal | 2014/11/01 |
| 2. | Isuduwayaasha Gobolka Awdal | Awdal | 2014/11/01 |
| 3. | Maalmulka Gobolka Awdal | Awdal | 2014/11/01 |
| 4. | Degmada Tog-wajaale | Gabiley | 2014/11/02 |
| 5. | Kastamka Kala-baydh | Gabiley | 2014/11/02 |
| 6. | Maamulka iyo Isuduwayaasha Gobolka Gabiley | Gabiley | 2014/11/02 |
| 7. | Golaha Deegaanka Degmada Gabiley | Gabiley | 2014/11/02 |
| 8. | Maamulka iyo Isuduwayaasha Gobolka Saaxil | Saaxil | 2014/11/04 |
| 9. | Maamulka Dekada Berbera | Saaaxil | 2014/11/04 |
| 10. | Maamulka Kastamka Berbera | Saaxil | 2014/11/05 |
| 11. | Maamulka Keydka Haamaha Shidaalka | Saaxil | 2014/11/05 |
| 12. | Maamulka iyo Isuduwayaasha Gobolka Tog-dheer | Tog-dheer | 2014/11/06 |
| 13. | Golaha Deegaanka Degmada Burco | Tog-dheer | 2014/11/06 |

# Golayaasha Deegaanka:-

## Golaha Deegaanka Degmada Boorame:-



- **Warbixinta Ku-simaha Maayorka Boorame:-**

Wuxuu sheegay Ku simaha Maayorka Booarem, inay sanadkii labaad kujiraan, miisaaniyadii 2013 da waxay ahayd miisaaniyad ay sii odoroseen Golihii Deegaanka ee ka horeeyay oo ay sii sameeyeen taas oo aheyd (5.5 bilyan), dakhligii soo baxayna wuxuu noqdey buu yidhi 7 bilyan Somaliland shilling isla sanadkaas mashaariicdii la sii qorsheeyeyna sidoodii bay u fuleen.

2014na Odoroska Miisaaniyada dakhli iyo qarashgaraynba sidii aanu ugu talo galay bay noogu soo baxeen.

Wuxuu sheegay inay Xeer Lr 23 wax yar kaga shaqeeyaan, waxa kale oo Mayor ku-xigeenku sheegay in Mashruuca JLPGga ay sanadka 2014ka kharashkiisu ahaa 300,000$, wuxuu kaloo noo sheegay in aaney ansixin Odoroska Miisaaniyada sababtuna ay tahey iyadoo Golihii uu fadhiisan waayay.

- **Caqabadaha iyo Baahiyaha uu maayeer ku xigeenku noo sheegay:-**

 Kabka:- Boorame waxaa xaga kabka ka yar hal degmo 7 degmo ee ugu waaweyn dalka, waxay aheyd in Degmoba degmadey ka weyn tahey xaga kabka loo kala badiyo.

 Kabka sanadkan 2014 Jan-aug 2014 waxaa loo gooyey %50 diiwaangelinta iyadana waxa halkaas ku baaqday mashaariicdii qorshaysnaa in la fuliyo.

 Xeer Lr. 23:- xeer lr 23 wuxuu sheegayaa inaanu cashuuri karno 21 item, Dawlada hoose ee degmada Boorame waxay cashuurtaa 8 item oo kaliya, markaa waxaa kaga maqan cashuurtii Iibka iyo cashuurtii leydhka oo xaqaasi wuxuu ku maqan yahay Dawlada dhexe.

 Xildhibaanadii Golaha Deegaanka:- Xildhibaanadii oo aan ka soo xaadireyn kal-fadhiga ayaa ah caqaba ugu weyn ee fulinta Golaha Deegaanka Boorame sheegay, kal-fadhigii marka la gaadho ma imanayaan mudanayashii la soo doortey, mar kaliya ayaa la isu yimi markiina buuq iyo qeylo ayuu ku dhamaadey fadhigii.

- **Cabashada Mudanayaasha Golaha Deegaanka Boorame:-**







- Xeer 23 Qod. 47aad waa la jabiyay oo wax kal-fadhi ah oo la fadhiistey ma jirto oo intii la soo doortey hal fadhi inay fadhiisteen bay noo sheegeen sharciguna wuxuu dhigayaa 2dii biloodba marbuu goluhu kal-fadhi yeelanayaa wax kalfadhi ah oo ay yeesheen ma jiro oo xildhibaanadii degmadan loo soo doortay ay kaga arinsadaan waxay bulshada u qaban lahaayeen.

- Ta labaad waxa weeye MIISAANIYADA waxa jira ku tagrifal miisaaniyadeed oo miisaaniyadii la ansixiyey habayaraatee laguma dhaqmo, Gudoomiye ku xigeenku (Maayarka) wuxuu idiin sheegay miisaaniyadii naloo sameeyey ee 7 2013 bilyan bay gaadhay tii dejisnaydna waxay ahayd 5.5 bilyan sharciguna wuxuu dhigayaa in 6dii biloodba la qiimeeyo goluhuna ansixiyo qarashaadka soo kordhay waxa lagu qabanayo waxa halkaas idinku cad in 1.8 bilyan shillings la musuqmaasuqay.

- Fulintu kabka waxa dawlada dhexe naga maqan iska daayoo tii na soo gaadhay baan loo isticmaalin sidii sharcigu dhigayay , 1.2 bilyanbaa Dawlada naga soo gaadhay sanadkii tegay oo Kab ah 2013 haba yaraatee wax mashaariic horumarineed meel lagu calaamadiyeyna majirto.

- Iyadoo dakhli korodhkaasi jiro, kabkii kordhay ayaa hadana 200 oo Milyan Baanka lacag laga soo amaahday oo sharcigu wuxuu dhigayaa hadii dayn goluhu gelayo golaha la soo hordhigayaa oo ansixinaya weliba waa haday dhacdo aafo qaran, aafona ma dhicin golena lama horkeenin hadana sanadkan Gudihiisa ayay mar kale 300 oo Milyan ku soo amaahdeen sidoo kale aafoqaranna may dhicin waana sharci jebin.

- Ta kale wax xisaab xidha oo golahaas weli la soo hordhigay ma jirto waana sanad iyo 9 bilood inta aanu joogney.

- Qod. 95 aad Xaraashka Hantida Deegaanka wuxuu dhigayaa golahaa ansixinaya lana horkeenayaa waana in la sababeeyaa iyadoo aanu ognahay in la boobay hantidii lana xaraashay hadana golaha weli lama hor keenin.

- Headhka la yidhaahdo SAHAY SAFAR wuxuu ahaa 85 milyan oo shilin 8 bilood gudahoodna wuxuu ku marayaa 165 Malyuun.

- Headhka Daryel Spare parts wuxuu ahaa ku-talagalkiisu 86 milyan 8 bilood gudahoodna wuxuu marayaa 140 milyan waad arkaysaan inaan markaa degmadan sharcigu ka shaqayn ee sidii la doono loogu takrifalay, ee hadaad ka shaqaynaysaan Dabagalka Hantida qaranka cid aanu u dhiibnaanu la'aynba ee wax ka qabta.

- Waxaanu ognahay sanadkan kabkii dawlada naga soo gaadhayin uu ahaa 370 milyan, 70 Milyan waxaa lagu iibiyey Xaajiyad dawlada hoose u shaqaysa, 300 milyan ee kalena magaranayno meel ay ku baxday.
- Gudiyada fulinta laftiygoodu waxay aheyd sida Xeer Lr 23 sheegayo inay weekly u shiraan, iyana wax shir ah ma qabsadaan, sidoo kale Guddida Joogtada iyo waaxyaha Dawlada hoose dhamaan wax kulamo ah ma yeeshaan.

- KALFADHIYADA GOLAHA:2014/2013 : waxay fadhiisteen 4 casho waxaanay ahayd in ay fadhiistaan 240 casho)

## - Kulankii Maayorka  Gabiley:-



Xubnaha Guddiga iyagoo sii wata safaradooda shaqo waxay isla 02 November 2014 booqdeen xarunta dawlada hoose ee magaalada gabiley, iyagoo halkaa kula kulmay Mayor ku xigeenka gabiley, ahna  ku simaha  mayorka oo uu weheliyo xoghaya fulinta dawlada hoose, badhasaabka  iyo tiro kooban oo xildhibaanada deeganka ah, Kulankan labada dhinac ayaa waxaa uu ku qabsoomay hoolka shirarka ee dawlada hoose ee Gabiley.

Kulanka ugu horeyn  waxaa furay badhasaabka gobolka ka dibna waxaa ka warbixiyey ujeedada safarka ee guddida gudoomiyaha guddida mudane maxamed cali xirsi, intaa ka dib waxaa ay guddidu warbixino ka dhagaysteen mayor ku xigeenka iyo xoghaya dawlada hoose.

Waxyaabaha ay qabteen intii ay xafiiska joogeen Deegaanka Gabiley:- Sida uu noo sheegay xoghaya fulinta dawlada hoose waxaa noo qabsoomay:

• Dhisme 14 school, 3 sariibadood, 9 wado iyo dhamaystir aanu ku samaynay Guriga martida ee Gobolka Gabiley,iyo balaadhin ay ku sameeyeen xafiiska guddihiisa iyo laba waxood oo cusub oo ay soo kordhiyeen oo kala ah waaxda qorshaynta iyo waaxda diwaangelinta   jinsiyada.

• Waxaa kale oo ay tabarucaad  lacageed ku darsadeen wadada isku xidha wajaale iyo kalabaydh, Isla goor  ahaantaana  waxa ay balan ku qaadeen inay ku tabarucayaan lacag dhisaysa 2km oo ah wadda Degmada Alaybaday.

• Waxaa kale oo ay tabarucaad  u fidiyeen ciidamada  qaranka somaliland, sida ay sheegeen mas'uuliyiinta deegaanku waxay ugu deeqeen deeq timir ah oo farabadn ciidamada qaranka  somaliland.

• Waxaa ay golaha deegeenku bixiyaan shidaalka iyo raashinka cusbitaal ka mid ah cusbitaalada gabiley,

• Sidoo kale waxay lacag dhan 50,000,000slsh ugu tabarucaan waxabarashadda gobolka haday tahay, dugsiyada hoose, dhexe iyo jaamacadahaba.

• Biiriij cageed oo ay dhiseen golahan hadda jooga kaas oo qabta shcoolka timacade.

Caqabadaha Haysta D.H.Gabiley:- Sida ay noo sheegeen madaxda dawlada hoose ee gabiley ee aan la kulanay waxaa ay cabasho ka muujiyeen waxyaabahan:-

• Caqabad ka haysta Xeer No 23.
• Wadashaqayn la'aan u dhaxaysa xildhibaanada iyo fulinta
• Kalfadhiyada Golah oo aan qabsoomin
(waxay fadhiisteen 2013/2014: 6 casho waxaanay ahayd in ay 240 casho)
• Shaqaale tiro badan oo gaadhaya (585 qof) oo aan soo shaqo tagin badankoodu, kuwaas oo musharkooda qaata, waxaanay qarash gareeyaan 375,000,000slsh bil kasta,halka shaqaalaha rasmiga ah ee soo shaqo tagaa ay yihiin 181 qof oo kaliya.

## - Golaha Deegaanka Degmada Burco:-

Iyadoo ay Degmada magaalada Burco kala siman tahay caqabadaha iyo cakir-naanta maamul ee degmooyinka kaleba ka jira sida is haysiga, kala-fadhiyada oo baaqda iyo kala qaybsanaanta golaha deegaanka dhexdiisa, Wallow aanay Guddida u suura galin sida degmooyinka qaar inaanu warbixinada ka dhegaysano iyaoo labada dhinacba wada fadhiya hadana waxay gudidu isku day-day in ay labada dhinacba ka dhegeystaan Xogta ay hayaan iyo sababta kalifaysa in khilaafkani sii socdo.





Mayor ku xigeenka degmada Burco ayaa gudidu shir-doceed ay la yeelatay waxa uu ku sheegay in golaha deegaanka Burco khilaaf aan weynayni dhex yaalo imikana wada hadalo iyo isfaham uu ka jiro isla markaana mudada ay joogeen ay wax badan qabteen kuna eedeyey xildhibaanada golihiisa deegaanka qaar aan diyaar u ahayn waxqabadka bulshadooda oo aanay ka soo xaadirayn kalfadhiyada golaha deegaanka marka loo yeedho oo kooramkoodu aanu buuxsamin.

Sidoo kale waxa gudidu kulan kale la qaateen xubno golaha deegaanka ka tirsan oo sheegay in Guddida fulintu ay siday doonayaan u maamulaan una dhaqaalaha iyo hawlaha degmada iyo dawlada Hoose ee Burco.

Gudidu mudadii ay Burco joogtay waxay Xaqiiqsatay inaanu inta badan shaqaynin Xeer Number 23/2002 ee lagu maamulo Golayaasha deegaanka. waxaana ku dabagalkoodii ka gaabisay Wasaaradda Arimaha gudaha oo ay ahayd inay ku kor joogto ku dhaqanka xeerkan.

Waxaa kaloo xusid Mudan in Wasiirka Wasaaradda Arimaha Guduhu soo saaray Go'aan lidi ku ah Qod 47aad Farqadiisa 1aad iyo 2aad ee Xeer 23/2002.

Arintan waxay sii murgisay muranadii ka dhex taagnaa Golayaasha deegaanka waxa isla Go'aankaasi Xanibay awoodihii ay xaqa u lahaayeen Golaha deegaanku ee ay kaga arinsan lahaayeen kor u qaadka adeegyada deegaanka iyo horumarkii degmadaba.

Waxa kale oo ay xidhibaanada qaarkood ku celceliyeen in degmada ay ka jirto wax isdaba marin badan, qaladaad ku jira sida miisaaniyada loogu dhaqmo, Golaha oo aan xisaab xidh la horkeenin iyo qaabka loo bixiyo dhulka danta guud..
KAL-FADHIYADA GOLAHA:badankooda way fadhiistaan

# - Kulankii Maayorka Caasimada:-



Sidaa si la mida 2014/09/02 waxay gudidu Xafiiskooda kula qaateen Kulan Mayorka Caasimada Hargeysa Md. Cabdiraxmaan Caydiid (Soltelco), Mayor Soltelco wuxuu noqday mayorka keliya ee Guddida siiyey documentigii aanu ka dalbanay isla markaana sidii aanu ula balanay u soo ajiibay Yeedhmadii Guddida.

Mayorku wuxuu warbixin naga siiyey 2dii miisaaniyadood ee 2013, iyo 2014, mashaariicda ay golaha deegaanku qabteen mudadii 2da sano ahayd ee ay xilka hayeen, taas oo qoraal iyo afba ay nooga war bixiyeen.

Wuxuu mayorku uga jawaabay Guddida su'aalo badan oo ku saabsan hab maamulkooda, miisaaniyada, shirarka golaha, xisaab xidhada , mashaariic aan la fulin iyo sababta keentay iyo Daymaha lagu leeyahay dawlada hoose , Dhamaana su'aalaha wuu uga jawaabay.
KALFADHIYADA GOLHA:badankooda way fadhiistaan

# - Kulankii Wasiirka Daakhilaga

Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha JSL ayay 2014/08/23 kulan kula yeelatay Xafiiskooda waxaanu wasiirku Guddida warbixin ka siiyey sida ay wasaaradu u shaqayso iyo hawlaha ay qaranka u hayso.

Waxa uu sheegay in ay hoos yimaadaan dhamaan goboladda dalkoo dhan, haya'ddaha amaanka sida: ciidamada booliska iyo dhamaan qaybihisa kala duwan sida RRU,SPU iyo kuwa ilaalada batroolka oo iyana aanu samayn doono dhawaan.

Waxa iyana sidoo kale hoos yimaada ciidanka ilaalada xeebaha, la dagaalanka mukhabaraadka oo labo qaybood ah kuwo wasaradda hoos yimaada iyo kuwo madaxweynaha hoostaga.iyo laanta socdaalka.

Wasiirku wuxuu warbixin dheer ka siiyey Guddida mashaariicda ay wasaaradu fulisay, kuwa ay hada wadaan iyo qorshayaasha ay mustaqbalka higsanayaan.

Ka dib su'aalo ay gudidu waydiisay Wasiirku wuxuu qiray in ay qalad ahayd inuu Golayaasha Deegaanada ka joojiyo kulamadii ay isku dooran lahaayeen, oo uu jebiyey Qod 47aad ee XEER 2002/23 Farqadihiisa 1aad ilaa 3aad waxaanu Guddida uga cudurdaartay arintaas isagoo Guddida u cadeeyey inuu maanta ku dhawaaqi doono inay u fasaxan yihiin kulamadooda ay doonaan in ay qabsadaan, isla kulankaas dhamadkiisii waxa uu saxaafada u sheegay in ay dhamaan Golaha degaanadu ay u fasax u yihiin in ay qabsadaan kulamadooda markii ay donaanba.

## - Baaqashadii Mayorada iyo doorkii Wasaaradda Daakhiliga:-

Waxaa Waajib Distuuriya ku ah madaxda iyo masuuliyiinta heer qaran ee dalkeena Jamhuuriyada Somaliland inay hortagaan ugana waramaan shaqada ay qaranka u hayaan sida ku Cad Qod. 53aad Farqadiisa 6aad iyo 7aad Dastuurka Qaranka, Innagoo ka duulayna QOD 39AAD ee dastuurka kaas oo cadaynaya in Golaha wakiiladu metelayo Shacabka JSL ahna Qaybta 1aad ee Xeer-dejinta dalka, ansixinta xeerarka, oggolaanshaha iyo ilaalinta siyaasadda guud ee hoggaaminta dalka. Goluhu iyagoo wakiil uga ah dadweynaha la xisaabtanka Xukuumada ladagaalanka musuqmaasuqa, maamul xumada iyo habsami u adeegsiga hantida guurtada iyo maguurtada ah ee qaranka.

Guddida ilaalinta iyo dabagalka hantida qaranku iyagoo ka jawaabaya cabashoyin iyo waraaqo eedayn musuq oo soo gaadhay Guddida waxay qorshaysteen la kulanka Mayorada degmooyinka iyo kormeerka Dawladaha Hoose ee dalka.

Gudidu waxay u yeedhay Mayorka Caasimada iyo Mayorka degmada Gebilay waxaanay ugu yimaadeen sidii looga dalbaday waxaanay Guddida siiyeen warbiximihii aanu uga baahnayn iyo dhukumentigii aanu ka dalbanay, intaa ka dib waxaanu waraaqo yeedhmo ah u qoray mayorada degmooyinka BURCO, LAASCAANOOD, BORAMA IYO CEERIGAABO. Markay gaadhay kulankii Mayorka magaalada Burco ayaa waxa Guddida soo foodsaartay caqabad ah inay iman waayeen, waxaanay Guddida u cadeeyeen in lagu amray inaanay kulamadaas Golaha wakiilada ka xaadirin in kastoo wax qoraala aanay noo keenin.

Mar labaad Guddidu waxay waraaqo yeedhmo ah u direen Maayorka Burco isla markaana aanu ogaysiis siinay Wasaarada Daakhiliga, taasoo uu mar labaad uu diiday in uu yimaado. Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha mudane Cali Maxamed Warancade oo 2014/09/08 gole weynaha hor yimi lana waydiiyey sababta ay u diideen in mayorada dalku hor yimaadaan gudiyada golaha waxa uu cadeeyey in Mayorada dalku hoos yimaadaan wasaaradiisa ayna banaanayn in loo dhaafo.

Guddida Ilaalinta iyo dabagalka Hantida Qaranku waxay isla maalintaas kulan la yeesheen wasiirka iyagoo waydiinaaya qodobda iyo xeerarka ay kaga joojiyeen maayarada in ay hortagaan Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka hantida qarank.

Wasiirku waxa uu Guuddida ka codasaday in ay laba maalmood fursad siiyaan si uu ugu soo faahfaahiyo qodobada sharciga ah ee uu adeegsanayo. ka dib markaanu ka waynay wax jawaaba waxaanu u qornay warqad ku taariikhaysnayd 2014/_09/20 sumadeeduna ahayd GW/G/O2014/238/1. Hadana jawaab la'aan darted waxaanu mar kale u qornay warqada sumadeedu tahay GW/G/-2014/270/01 kuna taariikhaysan --- kuna siinay in uu noogu soo jawaabo muddo toddoba casho ah gudahood, ilaa hadda oo ay taariikhdu tahay ---wax jawaab ah gudidu kamay helin.

# Isuduwayaasha Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dawlada ee Gobolada:-

## - Isuduwayaasha Gobolka Awdal:-

- Kulankii Isuduwayaasha Gobolka awdal waxaa ka soo qeyb-galey 7 isuduwe, waxaana isuduwe kasta ay Gudidu waydiisey 4 su'aalood oo kala ah:

1. Tirada Shaqaalaha Wasaaradiisa ee Gobolka,
2. Miisaaniyada Wasaaradiisa ee Gobolka kharashkeeda intuu yahay,
3. xafiis iyo gaadiidka inuu leeyahay iyo
4. baahidiisa kharash, Waxaana Jawaabahoodu noqdeen:

| No. | Magaca Hay'adda | Miisaaniyada Hay'adda Per Month | Waxaka Gaadha Boorama Per Month | % | Tirada Shaqaalaha | Tirada Gaadiid | Xafiis |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | W/ Dib u-dejinta | $13,631.00 | $ 143.00 | 0.90 | 3 | 1 | No |
| 2. | W/ Warfaafinta | $67,937.00 | 0 | 0 | 4 | 0 | 0 |
| 3. | W/ Beeraha | $ 15,909.0 | $355 | 1.91 | 23 | 1 | 1 |
| 4. | W/Waxbarashada | $113,328 | $1,538.1 | 1.16 | - | 1 | 1 |
| 5. | W/Macdanta iyo Tamarta | $17,758.00 | 0 | 0 | 0 | 0 | 0 |
| 6. | W/Ciyaaraha | $42,711.0 | 0 | 0 | 20 | 0 | 0 |
| 7. | W/Duulista iyo Hawada | $30,388.00 | $307.6 | 0.87 | 10 | 0 | 1 |

## - Isuduwayaasha Gobolka Gabiley:-

| No. | Magaca Hay'adda | Miisaaniyada Hay'adda | Waxa ka Gaadha Gabilay | % | Shaqaalaha | Gaadiid/ Xafiis | Xafiis |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Wasaaradda Maaliyada | 216,504.00$ | 3,076.9$ | 1.21 | 70 | 4 | |
| 2. | Wasaaradda Qorsheynta | 16,038.00$ | 0 | 0 | 1 | | |
| | 0 | 0 | | | | | |
| 3. | W/ waxbarashad | 113,328.00$ | 0 | | | | |
| | 0 | 2 | 0 | 1 | | | |
| 4. | W/diintaiyo awqaafta | 33,089.00$ | 0 | 0 | 4 | 0 | 0 |
| 5. | W/ Deegaanka iyo horumarinta miyiga | 32,222.00 | 0 | 0 | 6 | 0 | 1 |
| 6. | W/arrimaha bulshadaiyo shaqada | 16,824.00$ | 0 | 0 | 3 qof, isuduha ma qaato mushar, sanadna way shaqaynaysay | 0 | 0 |
| 7. | Wasaaradda dib u dejinta | 13,631.00$ | 30$ | 1.9 | 4 | 0 | 0 |
| 8. | Wasaaradda Ciyaaraha | 42,711.00$ | 0 | 0 | 1 | 0 | 0 |
| 9. | Komishanka ilaalinta tayada | $ 8,294.00 | 0 | 0 | 3 | 0 | 0 |
| 10. | W/ Ganagsiga iyo Maalgashiga | $ 22,366.00 | 0 | 0 | 18 | 0 | 1 |



## - Isuduwayaasha Gobolka Saaxil :-

2014/04/11kii Mudanayaasha Guddida ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ayaa safarkooda ee ay ugu kuurgalayeen xaaladaha dhabta ah iyo qiimanayta hay'addaha dawladda ee heer gobol ka bilaabay magaalado madaxda gobolka Saaxil ee berbera. Waxayna ugu horeyn booqdeen xafiiska badhasaabka ee Gobolka Saaxil oo uu ku sugnaa badhasaab ku xigeenka gobolka, isagoo badhasaabku hawlo nabad gelyo oo taagnaa uu uga maqnaa xafiiska, waftiga oo si meeqaam sare leh loogu soo dhaweeyey xafiiskiisa,




waddahadalo kooban oo la isdhaafsadey ka dib, waxaa la gudo-galey hawlihii shaqo ee ujeedada safarka iyadoo ay ku diyaar ahaayeen xafiiska inta badan isu-duwayaasha gobolku.Waxay isu-duwayaashu sheegeen in hawlaha gobolku si wanaagsan ugu socdaan, guud ahaana xaalada gobolku ay wanaagsan tahay, balse aanay jirin maamul daadajin ka jirta Gobolka.

**Caqabadaha iyo Baahiyaha:-**

Miisaaniyada: in aanay jirin kharashaad soo gaadha gobolka aan ka ahayn mushahar iyo kharashaad yar Wasaaraddaha iyo hay'adaha qaarkood saddex biloodkii ay helaan.
Dhismayaal xafiis: Isu-duwayaasha Gobolku intooda badan malaha Xafiis ay ku shaqeeyaan.
Gaadiidka: intooda badan isu-duwayaashu malaha gaadiid.
Miisaaniyada:- iyadoo Miisaaniayda aaney wax badan ka soo gaadhin, waxay dalbadeen in saamigii gobol ay ku lahaayeen miisaaniyada lasoo gaadhsiiyo

| No | Hay'adda | Miisaaniyada Hay'adda | Qarashka gaadha Brbera bishii | % | Gaadiid | Tirada Shaqala | Xafiis |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Wasaaradda Maaliyada | $216,504.00 | $6,666.6 | 2.6 | | 100 | 3 |
| 2 | korontada | Qarashkoda iyo dakhligodu wuu islegyahay | $ 100,000 | | 4 | 60 | 1 |
| 3 | Wasaaradda Beeraha | $15,909.00 | 39 | 0.27 | 1 | 6 | |
| 4 | Komishanka SOLNAC | $ 16,528 | 0 | 0 | 0 | 3 | |
| 5 | Komishanka dhawrista Tayada | $ 9,676 | 0 | 0 | | 5 | 0 |
| 6 | Wasaaradda Caafimaadka | $151,369.00 | 0 | 0 | 6 | 231 | 4 |
| 7 | Wasaaradda Hawlaha Guud guryeynta iyo Gaadiidka | $15,359.00 | 0 | 0 | 1 | 11 | 1 |
| 8 | Wasaaradda Waxbarashada | $113,328.00 | 0 | 0 | yes | **490** | yes |
| 9 | | | | | | | |
| 10 | Wasaaradda Diinta iyo awqaafta | $33,089.00 | 0 | 0 | 0 | 6 | 0 |
| 11 | Wasaaradda Xanaanada Xoolaha | $29,018.00 | | 0 | 3 | 22 | yes |
| 12 | Wasaaradda Dhalinyarad | $42,711.00 | 0 | 0 | 0 | 13 | 0 |
| 13 | Wasaaradda Qorshaynat | $16,038.00 | $341.6 | 1.8 | 0 | 6 | 4 |
| 14 | Wasarada Kaluumaysiga | $21,688.00 | 43.33 | 0.5 | 0 | 12 | 0 |
| 15 | Wasaaradda Deegaanka | $32,222.00 | 0 | 0 | 0 | 13 | 3 |

## - Isuduwayaasha Gobolka Tog-dheer:-



Kulankii ay Gudidu la gashay Maamulka Gobolka Togdheer iyo isu duwayaasha wasaardaha iyo hay'addaha Madaxa banaan ee Gobolka Togdheer wuxuu u qabsoomay sidii ugu wanaagsanayd waxaana ugu horayn warbixin amniga iyo xaalada guud ee Gobolka Guddida ka siiyey Badhasaabka Gobolka Togdheer Maxamed Muuse Diiriye, ka dibna waxa la galay kulan albaababdu u xidhnaayeen oo aan saxaafad loo ogolayn waxaana si hoose laysaga waraystay xaalka gobolka iyo sida masuuliyiinta heer gobol u fuliyaan shaqadooda iyo caqabaadka haysta.

Isu duwayaasha gobolka Togdheer ee Wasaaraddaha iyo Hay'addaha dawladu waxay warbixinta ay Guddida u soo jeediyeen isugu jirtay miisaaniyada xafiisyada gobolka soo gaadha hantida guurtada iyo maguurtada ah ee ay haystaan caqabadaha hawlahooda hor taagan.

Sida ku cad shaxdan hoos ku qoran imkaaniyaadka ay shaqada ku wadayaan isu duwayaasha gobolku waxay ku tusaysaa sida ay uga aradan yihiin wax kasta oo oo ay shaqada ku qaban lahaayeen, sidaa daraadeed waxay noqdeen shakhsiyaad mushaharka uun ka qaata dawlada laakiin ay yar tahay inay wax qabtaan, inakatoo aynu ogsoonahay in gobolkani yahay Gobol aad u balaadhan dad ahaan iyo baaxad ahaanba waana magaalo madaxda 2aad ee dalka.

Qiimayntani waa sanadkan 2014, miisaniyada ku qoranina marka laga saaro ta shaqaalaha oo grade ka dawlada iyagu ku mushaharo qaata. Waxa kale oo Table kani ku muujisan xafiiska heer gobol miisaaniyada gaadha Bishiiba iyo isla Wasaaraddaas bilkasta qarashkooda ay qaataan marka laga jaro mushaharada guud ee shaqaalaha oo dhan

| s/no | MagacaHay'adda | Miisaniyada Hay'adda bishii | Miis.Gaadha Burco Bishi | % | Shaqala gobolka | Gaadii/ Xafiis |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Wasaar. Caafimaadka | $ 151,369.00 | $ 4,166.6 | 2.35 | 385 | 12 gadhi |
| 2 | W. Diinta iyo awqaafta | $15,028.00 | 0 | 0 | 8 | 0,0 |
| 3 | Wasarada Waxbarashada | $ 113,328.00 | $ 888.86 | 0.67 | 1270 | 6 g 0 |
| 4 | W. Xanaanada Xoolaha | $ 29,018.00 | $ 2,777.76 | 8.20 | 48 | 4 gaadhi 3xafiis |
| 5 | Wasaaradda biyaha | $20,865.00 | 0 | 0 | 10 | 0,0 |
| 6 | Wasaaradda Qorshaynta | $16,038.00 | $ 50 | 0.26 | 7 | O gadid 1 xafiis |
| 7 | Wasaaradda Beeraha | $ 15,909.00 | $ 177. | 0.95 | 15 | 1 gaadhi Xarun |
| 8 | Wasarada A. Bulshada | $16,824.00 | $ 166. | | 14 | 1 gaadhi xarun |
| 9 | Wasaaradda Cadaalada | $ 7,079.00 | 0 | 0 | 6 | 0 gadiid 0 xafiis |
| 10 | Wasaaradda Ganacsiga | $ 22,366.00 | 0.0 | 0 | 9 | 1 gaadhixarun |
| 11 | Wasaaradda Duulista iyo Hawada | $ 30,388.00 | $ 666 | 1.88 | 46 | 5 gadiid 1 Xafiis |
| 12 | W. Macdanta & Tamarta | $ 17,758.00 | $ 0 | 0 | 1 | 1 Xafiis 0 gadiid |
| 13 | Wasarada Hawlaha Guud | $15,359.00 | 0 | 0 | 1 | O Gadiid 0 xafiis |
| 14 | Hay'adda Shaqaalaha | $ 25,599.00 | 0 | 0 | 4 | 1 Gaadhi 0 Xafiis |
| 15 | Wasaaradda Maaliyada | $ 216,504.00 | $ 183. | 0.07 | 72 | 2 gaadhi 1 office |

## - Isuduweyaasha gobolka SOOL

Gudoomiyaha Gobolka Sool waxa uu warbixintan hoos ku qoran uu nagu siiyey by Telephone

| No. | Magaca Hay'adda | Miisaaniyada Hay'adda Per Month | Waxa ka gaadha Gobolka P/Month | Boqol eyda | Shaqaalaha | Gaadiid/Xafiis | Xafii |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | W/ Dib u-dejinta | $13,631.00 | 114.00 | | 1 | 0 | 0 |
| 2. | W/ Warfaafinta | $67,937.00 | 0 | | 1 | 0 | 0 |
| 3. | W/ Beeraha | $ 15,909.00 | 469.00 | | 3 | 0 | 0 |
| 4. | W/Waxbarashad | $113,328.00 | 565.00 | | 357 | 0 | 0 |
| 5. | W/ Macdanta iyo Tamarta | $17,758.00 | 0 | | 1 | 0 | 0 |
| 6. | W/ Ciyaaraha | $42,711.00 | 0 | | 5 | 0 | 0 |
| 7. | W/Duulista iyo Hawada | $30,388.,00 | 142.00 | | 2 | 0 | 0 |
| 8. | W/ Xanaanada Xoolaha | $29,018.00 | 0 | | 8 | 0 | 0 |
| 9. | W/ Caafimaadka | $ 151,369.00 | 1,428.00 | | 150 | 1 | 1 |
| 10. | W/ Cadaalada | $ 7,079.00 | 1,128.00 | | 54 | 0 | 1 |
| 11. | W/ Arimaha Gudaha | 110,135.00 | 0 | | 10 | 2 | 1 |
| 12. | W/ Boosaha iyo Isgaadhsiinta | 46,282.00 | 0 | | 1 | 1 | 0 |
| 13. | W/ Diinta iyo Awqaafta | $33,089.00 | 0 | | 3 | 0 | 0 |
| 14. | W/Arimaha Bulshada | $ 16,824.00 | 0 | | 3 | 0 | 0 |
| 15. | W/ Hawlaha Guud | $15,359.00 | 0 | | 10 | 1 | 1 |
| 17. | W/ Biyaha | Miisaaniyad kuma jirto | 0 | | 3 | 2 | 1 |
| 18. | W/ Maaliyada | $216,504.00 | 925.00 | | 21 | 1 | 1 |
| 19.. | W/ Qorshaynta | $16,038.00 | 47.00 | | 6 | 0 | 1 |
| 20. | W/ Ganacsiga | $26,093.3 | 0 | | 4 | 0 | 0 |
| 21. | W/ Deegaanka | $32,222.00 | 0 | | 15 | 0 | 0 |

**Shaxda isbarbar dhiga guud ahaan goboladu qadarka ay ka helaan miisaaniyada**

| bkNo. | Wasaarada/ Hay'adda | Bishii Miisaaniyada | G. Awdal | G. Gabiley | G. Saaxil | G.Tog-dheer | G. Sool | Total | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Wasaarada Maaliyada. | 216,504.00$ | $ 2,086.0 | 3076.9$ | 6666.6$ | $ 183 | $ 925. | 12,938.00 | |
| 2. | Wasaarada Waxbrashada. | 113,328.00$ | 1,538.1$ | | 0.0 | 888.8$ | $ 565 | 2,992.00 | |
| 3. | Wasaarada Qorsheynta. | 16,038.00$ | 60$ | 0.0 | 341.6$ | $ 50 | $ 47 | 499.00 | |
| 4. | Wasaarada Caafimaadka. | 151,369.00$ | $ 1,809. | 0 | 0.0 | $ 4,166.6 | 1,428$ | 7,404.00 | |
| 5. | Wasaarada Beeraha | 15,909.00$ | 355$ | $ 83.3 | 0.0 | $ 177 | 469.0$ | 1,084.00 | |
| 6. | Wasaarada Xanaanada Xoolaha. | 29,018.00$ | 0.0 | Lama k. | 0.0 | $ 2,777.76 | 0 | 2,778.00 | |
| 7. | Wasaarada Deegaanka iyo H. rerer miyiga. | 32,222.00$ | 420$ | 0.0 | | 0.0 | Lama k u L . | 0 | 420.00 |
| 8. | Wasaarada Macdanta iyo Tamarta | $ 17,759.00 | 0.0 | 0 | 0.0 | 0.0 | o | 00.00 | |
| 9. | Wasaarada Duulista iyo Hawada | $ 30,388.00 | 307.6$ | 0 | Lama | $ 666 | $ 142.0 | 1,116.00 | |
| 10. | Wasaarada Ciyaaraha iyo Dhalinyarada | 42,711.00$ | 0.0 | 0.0 | 0.0 | Lama | 0 | 00.00 | |
| 11 | WASAARADA DAAKHILIGA | 110,135.00$ | 1,428.00 | 1,428,0 | 1,428.0 | $ 1,428.00 | 1,428.0 | 7,140.00 | |

Tusaale ku tusaya Waxa Miisaaniayda Guud ee Qaranka ka gaadha Gobolada dalka.:- Marka tu saale (sample) loo soo qaato 10 10 Wasaaradood ee aanu kulamadii Gudidda 4 Gobol ee Awdal, Gabiley, Saaxil iyo Tog-dheer ugu badnaa ugu badnaa waxa ka gaadha Miisaaniyada waxay muujineysaa in yar mooyee Wasaarada iyo Hay'adda Dawlada ee Gobolada intooda badan aaney Miisaaniyada Guud ee Qaranka waxba badani ka gaadhin

## - Dekada iyo Kastamada Gobolada:-

## - Kastamka Kala-baydh:-



Guddidu iyagoo hawshooda sii wata waxay isla maalintii taariikhdu ahayd 02 November 2014 booqdeen kastamka kalabaydh oo ka tirsan maamulka Gobolka Gabiley.

Markii guddidu ay soo gadheen halkaasi waxaa si diiran ugu soo dhaweeyey maamulkan kastamka kala baydh oo ugu horeeya maamulaha kastamka kalabaydh Cabdi-Hargeysa, Xubnaha guddida waxaa ay dhamaan soo tusay qaabka shaqo ee ay u socoto hawsha maalinlaha ah ee kastamku, xafiisyada ay isticmalaan, ka dib waxaana aad laysiga waraystay sida kastamka kala baydh xaaladiisa guud tahay iyo sida uu u guto waajibaadkisa shaqo.

Kastamka kalabaydh waxaa ka hawl gala dawlada dhexe ahaan, Wasaaradda kala ah Wasaaradda maaliyada iyo Wasaaradda ganacsiga iyo tulbataariyada. Shaqaalaha Wasaaradda maaliyada ee kastamku waa 38 shaqaale ah, halka ay Wasaaradda ganacsiga 14 shaqaali ahi u joogeen.



**Wax soo saarka kastamka kalabaydh**:- Kastamka kala baydh waa kastam labaad ee ugu waxsoosaarka badan xaga dakhliga dawlada, waxaa ka horeeya oo kaliya kastamka Berbera.

Kastamka kala baydh waxaa lagu cashuuraa dhamaan waxii kasoo gala Ethiopia, waxa ugu badan ee lagu cashuuraana waa Qaadka, waxaa uu kastamku maalintii soo saaraa dakhli dhan 566,778,000slsh kaas oo toos loogu soo shubo bandhiga gabiley maalin kasta, waxaanu maamulaha kastamku noo sheegay in aanay marnaba hoos uga dhicin 450,000,000slsh

**Baahiyaha haysta kastamka kalabaydh:**- Baahiyaha jira ee ay noo sheegeen maamulka kastamka kalabaydh waxaa ka mida:-

• In shaqaalaha Wasaaradda ganacsiga ee ka hawl-gala kastamka aanay qaadan wax dhiirigalina haba yaratee, halka shaqaalaha Wasaaradda maaliyada ee kastamka kalabaydh kawada hawlgalaan ay qaateen dhiirigelin

## - Kastamka Berbera:-






Kulankii Guddida Iyo Maamulaha Kastamka Berbera Mr. Maxamed Cabdi Gurxan, wuxuu maamuluhu ka waramay guud ahaan shaqada ay qabtaan iyo habka ay u shaqeeyaan, isagoo ugu horeyna sheegay inuu xafiiskoodu ka kooban yahay saddex waaxood oo kala ah waaxda dekada, waaxda airportka iyo waaxda haamaha, Wuxuuna sheegay in uu yahay xafiis ilaaliya cashuurtii saxda ahayd ee la qaadi jiray, wuxuuna xusay in kastamkan uu yahay ka ugu badan ee dakhliga miisaaniyada soo saara.

celcelis kay maalintii soo saarana wuxu usheegay inuu yahay 1.30 ilaa 1.50 bilyan, sidoo kale waxaa uu sheegay in 9 kii bilood eee u dambeeyey ay xareeyeen 415 bilyan oo ay ku jiraan dowlada hoose ee berbera oo ah 10 percentagekii caadiga ahaa, waxaa kale oo uu sheegay kharashka saddex biloodka ee ay isticmaalaan inuu yahay 100 milyan.

Wuxuu sheegay in qaababka cashuurta loo qaadaa ay yihiin laba qaybood oo kala ah ururin iyo maamulid, dhanka shaqaalaha wuxuu sheegay inay yihiin 80 shaqaale ah, saacadaha shaqada waxaa uu sheegay in laba shift usoo galaan shaqada shiftga koowaadna uu soo galo 6:30 subaxnimo ilaa 12:30 duhurnimo, maadaama ay tahay xeeb dib shaqada ay ugu soo noqdaan 1:30 ilaa 6:00 fiidnimo, halka shiftga kalena uu soo galo 6:00 ilaa 2:30 habeenimo.

Dhanka kale wuxuu sheegay inuu jiro buug lagu qoro shay kasta oo dalka soo galay ama la filayo inuu imaado, kuwaas oo lagu bilaabayo marka markabku ama doonto timaado, waxaa uu sheegay in saraakiisha xafiiska qaybta boodhinka inay koraan markabka ayna kasoo qoraan original manifest form laga buux buuxiyo isla markaana la noodh gareeyo noocyada alaabta kala duwan ee u sido markabka ama doontu, lana calaamadiyo sidana lagu sasaxo kadibna lagu so xidho dekada.

Waxaa kale oo uu xusay in Wasaaradda ganacsigu ku leedahay xafiis hubiya liisanka iyo sharcigii dajineed inuu leeyahay, isla markaana marka uu soo siiyo warqada ogolaanshaha inuu la imanayo xafiiska manifestaha, halkaasna lagu hubinayo in qofka cashuur bixiyaha ah lagu hayo buuga original manifestaha, hadii uu khalad jirana xafiiskaasi soo qabanayo. Dhanka kale waxaa uu maamuluhu sheegay inay sameeyaan cashuur dhaaf, kaas oo ay u sameeyaan warshadaha wax soo saarka dalka, waxaana bixiya wasiirka maaliyada, agaasimaha guud iyo waaxda kastamaduba markay soo wada hubiyaan documentigu inuu sax yahay.

**Caqabadaha iyo baahiyaha:-**

Miisaaniyada: in dib u eegis loogu sameeyo kharashaadka kastamka maadaama uu yahay kastamka ugu dakhli soo saarka badan saddex biloodkiina ay isticmaalaan 100 milyan ay kala badan yihiin baahida iyo kharashka loogu talo galay.

## - Dekeda Berbera:-



2014/04/11 ayay Gudidu kormeer ku tageen Dekada Berbera iyada oo kulan la yeesheen Maareeye Ku-xigeenka Dekada Mr. Cumar Abokor, maareeye ku-xigeenku waxaa uu Guddida u sheegay inay si wanaagsan ugu socdaan hawl maal-meedka shaqadu, waxaanu xusay in 1000 shaqaale ah iyo 2500 oo muruqmaal ka hawl galaan, 24 saacadoodna ay shaqayso.

Dhanka dhaqaalaha, waxaa uu xusay in badi dhaqaalihii kasoo bixi jiray dekada ay la wareegtay Wasaaradda maaliyadu, waxaanu xusay inay maamul ahaan hoos tagaan madaxtooyada.

Dhanka kale waxaa uu xusay inay gacanta ku hayaan mashruuc balaadhin dekada ah, qaybtii koowaad oo ka kooban 140 mitir ay gabo-gabo ku dhowdahay qaybta kalena ay bilaabi doonaan dhowaan.

**Caqabadaha iyo Baahiyaha:-**

 Dhanka caqabada waxaa uu xusay in ay dekadu u baahan tahay balaadhin lagu sameeyo, waxaanu sheegay in loo baahan yahay in lagu kordhiyo ilaa 350 mitir oo leh gandry clean oo ah qalabkii maraakiibta laga dejinayo alaabta.

## - Haamaha Shidaalka Berbera



Waxay Gudidu booqatey Keydka Haamaha Shidaalka Magaalada Berbera, waxayna sidoo kale kulan balaadhan la yeelatey Maamulka Haamaha Shidaalka oo ugu horeeyo Maareeye ku-xigeenka Haamaha Shidaalka oo ay wahiliyaan Agaasimayaasha Waaxaha Operationka iyo Maaliyadu, Maareeyaha oo Guddida Warbixin siiyay Waxaa uu ugu horeynba sheegay hay'addu tahay hay'ad dawladeed oo dawladu ay maamusho hoostagtana Wasaaradda Ganacsiga maamul ahaan, waxaana uu xusay in heshiiskii lala galay TOTAL uu ahaa mid wanaagsan, balse nasiib daro heshiiskaa marka la akhriyo wixii ku qornaa aan la daba galin, isla markaana wuxuu sheegay inay shirkada TOTAL wax la taaban karo ay ka tagtay ayna ugu muhiim sanayd biriishkaa ay maraan shidaalku ee productga ka soo qaada markabka, kaas oo dayactir weyn lagu sameeyey isagoo halis u ahaa inuu dumo.

Mar uu ka hadlaayay cida ay hoos tagaan maamul ahaan waxaa uu sheegay inay hoos tagaan Wasaaradda ganacsiga laakiin ay financial ahaan madax banaan yihiin, waxaa kale oo uu hoosta ka xariiqay in dhaqaalaha kasoo baxa haamaha shidaalka ay %70 qaadato dowlada dhexe halka %30 kana ay mushahar iyo baahiyaadka kale ee haamaha lagu qabto.

Mar uu ka hadlayay dakhliga ay soo saareen sanadkii hore bishiiba wuxuu sheegay inuu ahaa 150$ - 120$ bishiiba.

Waxaa kale oo isna ka hadlay Operation Officer ka Haamaha shidaalka Mr. Rashiid oo sheegay inay laba deport oo midi ku yaalo Airportka iyo ka xarunta, wuxuuna sheegay in ka airport ku gaar u yahay shidaalka nooca loo yaqaan jat A1, qaybta kalena ay yihiin batrool naafto iyo jat.

wuxuu kaloo sheegay in guud ahaanba haamaha tiradoodu ay tahay 24 hakala duwanaadeen volume ka ay qaadaan, 5 haamood ka mida waxaa la dhisay badhtamihii kontomeeyadii wakhtigii gumaystaha, 14 haamood oo ku xigayna ay dhistay dowladii

ruushka badhtamihii todobaatameeyadii, 5 haamood oo kalena la kala dhisay 82 kii iyo 84 kii  ay dhistayna dawladii maraykanka.

Waxaa kaloo uu sheegay in Labadaa deport lagu maamulo 3 product oo kala ah naafto, baatrool iyo jat, wuxuu intaa ku daray in  shirkado maxali ah shidaalka kusoo shubtan, shirkadahaasna lala galo handling agreement, isla markaana uu heshiiskaas ku qeexan yahay systemkii iyo hanaan kii loo wada shaqaynayay.

Waxaa kale oo uu sheegay inay qorshaha ugu jirto inay dib u habayn ku sameeyaan haamaha, laba ka fadhiyana ay dib u kiciyaan, isagoo sheegay inay laba qaybood u kala qaybineen.

Guud ahaan kaydka haamaha ee naaftada wuxuu sheegay inuu hada yahay 18000 oo meter quip, batrool kana uu yahay 6600 jatkana 4300, wuxuu sheegay sida qorshahoodu yahay naaftada ay ku dari doonaan 7000, batroolkana 3300.

**Caqabadaha iyo baahiyaha:-**

Haamaha shidaalka oo qeybi tahe gabow aan la isticmaali Karin oo markaa u baahan in meesha laga tuuro, inta hadheyna waxay u baahan tahay in dayac tir balaadhan lagu  sameeyo.

Dhuunta shidaalka ka soo qaada Markabka oo ah mid kaliya oo hadii ay xumaato




aan badal kale jirin, dhuuntaasina waa dhuun heerkeedu yahay mid inaga sareysa.

Dakhliga aan soo saarno %70 Wasaaradda maaliyada ayaa qaadata, %30 soo hadhey ayaa noo miisaaniyad ah oo mushahar, kharash iyo maintainance, markaa miisaaniyada aanu ku shaqeyno maaha mid dabooleysa baahiyaha iyo dayactirka loo baahanyahay.

## - Degmada Wajaale:-

Ugu horeyn guddida ilaalinta iyo dabagalka hanti qaranka waxay xafiiskiisa kula kulmeen Guddomiyaha degmada wajaale Md. Xaashi Maxamed Cabdi, ugu horeyna Guddoomiyaha GI&DHQ Md. Maxamed Cali Xirsi ayaa ka war-bixiyey ujeedada safarka guddida, sheegayna in ujeedada ugu weyni ay tahay xogagaal u noqoshada xaqiiqda dhabta ah ee degmada wajaale, iyo inay su'aalo ka waydiiyaan madaxda degmada wajaale xaalada guud ee degmada iyo sida ay u maamulaan hantida qaranka ee ay gacanta ku hayaan, su'aalo iyo jawaabo la iswaydaarsadey kadib waa kan nuxurka guud ee warbixinta degmada wajaale.

Magalada wajaale waa magaalo ku taala xuduuda u dhaxaysa Somaliland iyo Ethiopia waana magaalo ku xoogbadanyahay ganacsiga isaga gudbaya Somaliland iyo Ethiopia, wajaale waa degmo "D" ah.

**Baahiyaadka Aas-aasiga:**- magalaada wajaale malaha baahiyaadkii aas-aasiga ahaa ee ay u baahnayn sida Ciidamo booliis ah oo ku filan, saldhig boolis oo qalabaysan ama leh dhisme ku filan tirada maxaabiista ku xidhan.

Tiraba waxaa jooga 50 askari saldhiga wajaale, cusbitaal guud malaha degmadu, jidad fiican oo laamiya ma leh hase ahaatee waxaa jira kuwa maamulka degmadu hirgaliyeen oo tirabda dhan 5 sida ay noosheegn iyo kuwa caro tuul ah.

Magaaladu ma laha nidaam biya galineed oo rasmi ah ( water supplying system), dadka waxaa u dhaamiyaa waa booyado maxaliya. Degmada wajaale waa magalaalo uu xadiga dhulkeedu aad ku kooban yahay waxay degmada maamushaa oo kaliya $5km^2$,
Sida uu sheegay gudoomiyaha wajaale md Xashi Maxamed, waxayna degmadu rabtaa in derejadeeda kor looga qaada heerka ay imika tahay xadiga dhul ee ay maamusha laga dhigo mid ka badan $5km^2$

**Wax yaabaha maamulka degmadu qabsadey**
Sida ay noo sheegeen madaxde heer degmo ee wajaale waxaa maamulka hadda jooga qabsadeen;
- 6 laami oo cusub oo magalada dhex mara iyo kuwa kale oo caratuula,
- Hal sariibad oo cusub iyo hal kawaan
- dakhliga oo hore u ahaa 800,000slsh imikana maraya 5,000,000slsh maalin kasta,
- Dawlada hoose oo sadex qol ay ku kordhiyeen

Dakhliga iyo dhaqaalaha degmada:- waxaa maalintii ka usoo xarooda dakhliga dhen 5,000,000 slsh ah, degmadu ma qaado wax cashuuraha bariga (land revenue) iyo cashuuraha loo yaqaan kuwa iibka ( sales tax), waxaa ay degmada wajaale qaadaa oo kaliya macaash-macaash (income tax) sanadkii hal mar, iyo ardiyada guryaha oo iyana sanadkii hal mar.

Dhibaatooyinka haysta degamada wajaale:- Dawlada hoose ee wajaale waxaa haysta dhibaatooyin asaasiya sida
- Gadiid yari;
- Shaqaale tiro badan oo aan lahayn xirfad aqooneed oo ay ku shaqeeyaan,
- Saldhiga booliska ee wajaale malaha haba yarattee wax gadiid ah;
- Dhisme yari haysta saldhiga ciidanka ee wajaale;
- Ciidan yari haysta degmada wajaale

## - Waaxda Garsoorka

Tog-dheer:- Waaxda Garsoorka oo aanu la kulanay masuuliyiin ka tirsan oo uu ka mid yahay gudoomiyaha Maxkamada Rafcaanka Gobolku waxay noo sheegeen in ay guud ahaanba ka aradan yihiin dhismayaasha iyo dhaqaalaha miisaaniyada ka soo gaadha ee ay qarash ahaan u isticmaalaan, waxa dhisan 3 Maxkamadood halka 5 maxkamadood ay dunsan yihiin isla markaana ay u baahan yihiin dibu dhis iyo qalabayn.

Waaxda Garsoorka oo ka mida 3da dhardhaar ee nidaamkeena dawliga ahi ka kooban yaha, ayaa waxa gobolka dhan miisaaniyada ka gaadhaa waxa uu yahay 3,000,000 sl/ shillings ah taas oo aan haba yaraatee waxba kafaynaynin.

## Badhasaabada Gobolada:-

Intii Gudidu kormeerka Gobolada ku guda jireen waxay sidoo kale markasta kulanka iyo xidhiidhka kowaad la yeelanayeen hadba badhasaabka Gobolkaay marayaan, waxayna kulamo lakala yeesheen Badhasaab ku-xigeenka Gobolka Awdal Md. C/raxmaan Nuur Sugaal, Badhasaabka Gobolka Gabiley Md. Mustafe Shiine, Badhasaab Ku-xigeenka Gobolka Saaxil Md. Khaddar iyo badhasaabka Gobolka Tog-dheer Md. Maxamed Muuse Diiriye, waxaana badhasaab kasta Guddida Warbixin ka siiyay xaalada Guud ee Gobolkiisa iyo Maamulka shaqo ee Xafiiskiisa.

Sida Qodobka 111 farqadiisa5 ee dastuurku sheegaayo Gudoomiyayaasha Goboladu iyaagaa uga masuula Gobolka Dawlada dhexe, waxaa kaloo qodobka 112 ee distuurku farqadiisa 1 sharxaysaa dhammaan adeegyada bulshada ee Gobolada in ay badhasaabyadu uga masuulka yihiin dawlada dhexe.

Haddaba tiiyoo uu distuurku qeexaayo Muhiimada ay badhasaabyadu u leeyihiin qaranka. ayaanay hadan ka muuqan awoodahaa uu distuurku siiyey haday tahy mid dhaqaale iyo mid awood ahaaneedba. Waxaa xarumaha Gudoomiyaasha ee Gobolada oo dhan rakaadisay baahiyo badan oo aan marna u suura gelinayn in ay gutaan waajibaakooda distuuriga ahaa, taasoo aanu qabno in ay qarankan u hayaan hawlo ka culus shaqooyinka ay hayaan wasiiro faro-badani.

Waxaanu qabnaa in ay wasaarada daakhiligu ka gaabisay role keedii kaga aadanaa Madaxda gobolada, isku soo wada duuboo waxay Dhamaan badhasaabadu muujiyeen cabashooyin dhanka Miisaaniyada ah oo caqabad ku ah taaba-galinta Masuuliydooda shaqo iyo Maamul daa-dejinta,

Mudanayaal Mushahaarada iyo gunnooyinka ay kala qaataan waa sidatan:

1. Gudoomiye (Mushahara) 150$ per month, (Gunno) 300$ per month
2. Gudoomiye ku xigeen (Mushahar) 150$ per month, Gunno $ 500 per month
3. Qarashaadka kale sida nabadgelyada, fidinta maamulak , Gurmadka ciidanka, Biilasha tel internet, laydhka iwm waxay u haystaan Miisaaniyad ku dhaw 1,400$ bishii.

Mudane waxaad halkan ka fahmi kata siday ugu adagrahay in ay gutaan waajibaadka ka saran gudashada xilka gobolada ay madax ka yihiin, marxaladani waxay ku qasabtaa in ay noqdaana madax dulsaar ku ah maayarada Gobolada ay madaxda ka yihiin.

Siday doontoba ha ahaatee Gudoomiyayayasha Goboladu waxayna si wada jira Guddida ugu soo gudbiyeen baahiyahooda Guud, iyagoo sheegay inay Dawlada gaar ahaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo maaliyadaba ay si wada jira ugu gudbiyeen qoraal ku saabsan cabashadooda.

.Baahiyaha Badhasaabada Gobolada:- Waxaa shaxdan hoose ka muuqda Baahiyaha Xafiisyada Maamulada Gobolada oo ay saxiixeen Badhasaabada Goboladan: Maroodi-jeex, Sanaag, Tog-dheer, Sool, Saaxil Awdal iyo Gabiley, taasoo ay ku muujiyeen baahiyaha goboladooda.

| No. | Waxyaabaha baahidu ka jirto | Kharashka per Month |
|---|---|---|
| 1. | Nabad-galyada iyo fidinta Maamulka | $5000 (shan kun oo dollar) |
| 2. | Gurmadka iyo Hawlgalada Ciidanka | a) 2000 oo litter patrol ah<br>b) 300 oo litter nafto ah |
| 3. | Shirarka Wacyigalinta iyo Casuumadaha | $3000 (saddex kun oo dollar) |
| 4. | Habeen dhaxyada | $1500 (kun iyo shan boqol oo dollar) |
| 5. | Media (saxaafada) | $1000 (kun dollar) |
| 6. | Mushaharka | • $3000 (saddex kun oo dollar) **Gudoomiyaha**<br>• $2500 (laba kun iyo shan boqol oo dollar) **Gudoomiye ku-xigeenka** |
| 7. | Laydhka, internetka, telephonada iyo stationaryga | $1500 (kun iyo shan boqol oo dollar) |
| 8. | Isugeyn Guud | $22,500 (laba iyo labaatan kun iyo shan boqol oo dollar) |

## Wax yaabihii ka soo baxay Guud ahaan Kormeerka Gobolada:-

Kormeerkan oo sidaan soo sheegney ay mudo 9 cisho qaatay waxaanu ku soo kala marnay Gobolada Awday , Gabiley, Saaxil iyo Tog-dheer, waxaa ka soo baxay Kormeerkan waxyaabahan soo socda:-

1.In Golayaasha Deegaanka ee Degmooyinka aan soo sheegnay aaney u gudan Waajibaadkoodii shaqo sidii loo baahnaa iyagoo aan ku dhaqmin Xeer Lr. 23.

2. In aanay Golayaashii deegaanka ee la soo doortay badankoodu aanay ka qayb qaadan iyagoo isku duuban Go'aan gaadhista iyo waxkaqabadka degmooyinkooda.

3. In Golayaasha Degaanku aanay u madax banaanayn gudashadooda shaqo oo ay wasaarada Arrimaha Gudahu ku hayso faro-gelin sharciga baal marsan.

4. In dhammaan Gobolada iyo degmooyinka looga baahan yahay maamul daadejin degdeg ah haddii ay tahay mid miisaaniyadeed iyo mid maamulba.

5. In Xafiisyada Goboladay (Badhisaabyada) aanay lahayn Miisaaniyad ku filan oo ay ku gudan karaan shaqooyinka ay qaranka u hayaan.

6. In dhammaan Hay'adhaha dawalada iyo wasaaradaha ka hawlgala goboladu aanay lahayn: miisaaniyad ku filan waxaa kaloo xusid mudan in aanu halkan ka cadayno in ka badan %90 miisaaniyada hay'ada/wasaarad walba lagu isticmaalo xarunta guud ee Caasimada Hargaysa taasoo abuurtay In Gobolada ay ka jirto baahiyo faro badan oo ay ka mid tahay mid shaqaale, gaadiid, xafiis iyo mid Miisaaniyadeedba.

## Talo-bixinta iyo Soo jeedimaha Guddida:-

Mudanayaal:

Guddida Illaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranka iyadoo ka duulaysa xogta ku duugan warbixinta ee sare ku faahfaahsan waxay soo jeedinaysaa arimahan soo socda

1. In la gobaleeyo Miisaaniyada qaranka ee 2016 loona diyaariyo dhammaan xeerarki ay u baahnayd si taas loo helo.

2. In Hay'adaha dawlada ee ka hawl gala gobolada loo kordhiyo qarashaadka ay ku shaqeeyaan (Running Cost) %50 Odoroska Miisaaniyadda Sanadeedka 2015 ee hadda in hor yaal.

3. In loo kordhiyo Mushaharka hadda qaataan Badhasaabyada iyo Ku-xigeenaddooda Dhamaan Gobolada Dalka.

4. In la kordhiyo Miisaaniyada loogu talo galay arimaha nabadgelyada iyo maamul daadejinta ee Ismaamulka Gobolada Dalka iyadoo lagu saleynayo baahidooda ay soo qorteen waana in ay Wasaaraddaha iyo Hay'addaha dalku ay u dejiyaan qorshe cad oo leh hiigsi muuqda xarumahooda ka furan dhamaan Gobolada dalka.

5. In dib u eegis lagu sameeyo mushaharka iyo miisaaniyada waaxda garsoorka

6. In Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Madaxbanaan ay siiyaan tababaro iyo aqoon korodhsi joogto (Continuous Professional Training) shaqaalahooda ka hawl gala dhamaan goboladda dalka JSL

7. In Hay'addaha iyo Wasaaraddaha Dawladdu ay ka furtaan xafiisyo dhammaan Gobolada dalka. Una fidiyaan qalabayn ku filan dhamaan xarumahooda iyo xafiisyaddooda heer gobol, si shaqaalahaasi ay u gudan karaan shaqadooda si habsami ah, una bixiyaan adeegyo fiican oo tayo leh (excellent and quality services).

8. In dhamaan madaxda hay'addaha iyo Wasaaraddaha dawladda ay si joogto dabagal iyo kormeerid ugu sameeyaan xafiisyadooda goboladda si ay ula socdaan xaaladahooda gaarka ah una qiimeeyaan nooca adeega ay siinayaan dadka bulshadooda.

9. In La dhamaystiro Mashruuc Sharciga Xeerka Miisaanayada Qaranka, kaas oo qeexaya habkii loo raaci lahaa samaynta iyo dabo-galka Miisaaniyada , si ay u noqoto Miisaaniyada Sanadeedku mid ku salaysan Sharciyadda, cadaaladna ugu xaqsoorta dhamaan hay'addaha ,Wasaaraddaha Dawladda iyo gobolada dalka.

10. In Golaha Wakiiladu waxba kama jiraan ka dhigo wareegtadii Wasiirka Arrimaha Gudaha uu kaga joojiyey Golayaasha Degaanka fadhiyada aan caadiga ahayn maadaama ay baal marsantay xeerarka wadanka u yaala.

11. In Wasaarada Arrimaha Gudahu ay si dhakhso ah uga qaado xayiraada ay ka saartay Maayarada in aanay hor yimaadaan Guddida Ilaalinta iyo Dabogalka Hantida qaranka ee Golaha wakiilada.

12. In wax-ka-badal iyo kaabis lagu sameeyo Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer Lr.23 oo ay ka maqan tahay xidhiidhka ka dhexeeya Golayaasha degaanka iyo Golayaasha Baarlamaanka qaranku.

13. In Wax-ka-bedel iyo kaabis lagu sameeyo Xeerka Mideynta Cashuuraha Xeer Lr.12, kaasoo dhammaan golayaasha deeganku muujiyeen in baahi badan loo qabo dib eegistiisa iyo dhamaystirkiisa.

# Gabo-gabo:-

Guddidu iyadoo soo dhawaynaysa ixtiraam wayna u haysa dhamaan madaxdii iyo hawlwadeenadii kala duwanaa ee ay la kulmeen dhamaan gobolada dalka. Waxay ku nuuxnuuxsanaysaa soona jeedinaysaa arimahan

1. In dhamaan Mudanayaasha Goluhu nagu taageeraan codkoodan siiyaan dhamaan soo jeedimaha xaga sare ku xusan
2. In Guddidan iyo Guddiyada kaleba laga siiyo miisaaniya kab ay ku hawlgalaan kuna waajibkooda Dastuurka
3. In Shaqaalaha Golaha iyo Lataliya yaashaba il gaar ah lagu eego loona kordhiyo Mushaharka iyo Gunada ay hadda ku hawlgalaan.

**Liiska magacyada Gudida ee saxeexay warbixinta Kormeerka**

| S/ NO | MAGACA XUBANA | XILKA | SAXEEXA |
|---|---|---|---|
| | XIL. MAXAMED CALI XIRSI | GUDOOMIYE | |
| | XIL CABDIQADIR JAAMAC XAAMUD | G. KUXIGEEN | |
| | XIL. XUSEEN ISMAACIIL YUUSUF | XUBIN | |
| | XIL. MAXAMED FAARAX QABILE | XUBIN | |
| | XIL RASHID MAXAMED ISMAACIIL (HOOS-UJED) | XUBIN | |
| | XIL. NAASIR XAAJI CALI SHIRE | XUBIN | |
| | XIL IBRAHIM AXMED SH. MUUSE | XUBIN | |